## Sanbalka Candhuufta

Candhuuftu waa xaakada aad soo qufacdid ee ka timaada sanbabada ama cunaha. Haddad leedahay astaamaha TBda sanbabada, waxa lagaa qaadayaa dhawr sanbal oo candhuuf ah oo loo dirayo shaybaadhka. Markaa waxa lagu eegayaa mikaraskoob sii looga hubiyo in laga arko jeermiska TBda.

Marka lagu eego mikroskoobka haddii la arko jeermiska, taas waxa la yidhaahdaa dheecaanka candhuufta jiritaanka TBda waxaana aad u dhici karta inaad dadka kale cudurka qaadsiisid marka aad qufacdid ama hindhistid.

Marka lagu eego mikroskoobka haddii la arkiwaayo jeermiska oo baadhitaanada kale ay sheegaan inaad TB qabtid, taas waxa la yidhaahdaa dheecaanka candhuufta bilaa TBda. Taas macnaheedu waxa weeye waxay u dhowdahay inaadan cidkale u gudbinin cudurka.

## Baadhista abuurista-jeermiska

Haddi candhuuftaada la baadho shaybaadhku wuxuu isku dayeyaa bal inuu eego in jeermiska TBda sanbalka laga abuuri karo. Taas ayaa la yidhaahdaa baadhista abuurista-jeermiska.

Haddi loo maleeyo in TB du kaa hayso meelo kale oo jidhkaaga ah oo aan ahayn sanbabada ama cunaha, halkaa jidhkaaga ah ee loo maleeyay iney TBdu kaa hayso ayaa laga soo qaadayaa xubin yar oo sanbal ah
( waxa la yidhaahdaa biopsy) ama inyar oo unugyo ama dheecaan ah ayaa lagu soo qaadayaa irbad. Taas ayaa loo dirayaa shaybaadhka si looga eego in jeermiska TBdu ka kori karo sanbal (abuurista-jeermiska).

Maxaayeelay si gaabis ah ayuu jeermiska TBdu u koraa oo tarmaa, inta aan jawaabta la gaarin baadhista abuurista-jeermisku waxay qaadan kartaa ilaayo 8 wiig. Haddi TBda laga helo qayb ka mid ah jidhkaaga oo aan ahayn sanbabada waxa lagaa qaadayaa sawir feedhaha ah si loo hubiyo inaanay sanbabadu qabin TB.

## Hay'adda TB Alert

**TB Alert** waa samafalka kaliya ee UK gudihiisa kor u qaada dareenka TBda adduun weynuhu. Waanu taageernaa mashaariicda UK gudaheeda ah iyo wadamada soo koraya anagoo hubineyna in bukaan badani helay macluumaadka iyo daaweynta saxa ah. Taageeradaadu waxay si dhab ah nooga caawineysaa la dagaalanka TBda adduunweynaha, nolol badanna wey badbaadineysa.

Ka badbaadi TBda qoyskaaga iyo saaxiibadaa – qaado dawada TBda

**Ogsoonow** intaad dawada qaadaneysid waxa talo iyo caawimo kuula joga kalkaaliyaha. Fadlan la xidhiidh kalkaaliyaha TB haddaad dareentid xanuun ama aad wax ka garanweydo dawooyinka aad qaadaneysid.

Kalkaalyahaaga TBdu waa: ______________________

Dhakhtarkaaga cisbitaalku waa: ______________________

Kala xiriir: ______________________

Email: ______________________

**TB Alert** waa hay'adda kaliya ee samafal kuna taal UK ee kor u qaada ogaalka qaaxada aduunweynaha kuna caawisa NHSta iney warbixin siiso bukaanka. Waanu taageernaa mashaariicda hubinaysa iney dadka buka ee wadamada soo korayaa heleen daawyn iyo wacyigelin saxa. Hadaad na taageerto saamayn la taaban karo ayaanu u geysaneynaa TBda aduun weynaha dad badana wuu badbaadi.

**TB Alert**,
Community Base,
113 Queens Road,
Brighton BN1 3XG
Tel: 01273 234030

Wixii warbixin dheeraada ah iyo nuqulka warqaddan, fadlan kala xiriir 01273 234 770 (xiliga shaqada oo kaliya).

Sii aad deeq ama iska-wax-u-qabso u tartid TB Alert,fadlan kala xiriirt 01273 234 784 (xiliga shaqada oo kaliya).

Ama gal websaytkayaga www.tbalert.org

Warbixinta warqaddan ku qoran ee ku saabsan baadhitaanka iyo daaweynta Qaaxada waxa loola jeedaa warbixin guud uun, loolama jeedo iney kuu bedesho aqoontii iyo xirfaddii iyo go'aamintii ay lahaayeen dhakhaatiirtu, farmasiilayaasha iyo/ama aqooyahanada kale ee daryeelka caafimaadka ee daryeela bukaanka. Warbixin kaliya oo warqaddan ku qoran looguma talo gelin go'aaminta baadhista ama daaweynta. Su'aalaha iyo wixii khuseeya ee ku saabsan baadhista iyo daaweynta waa in loo gudbiyaa aqoonyahanada daryeelka caafimaadka.

Shaqada horumarka aasaasiga ah ee Shabakedda North London TB

A company limited by guarantee Registered in England No. 3606528 Registered Charity No. 1071886 design: worksong, london 020 8352 8300

WARBIXINTA DADKA BUKA

# Qaaxada (TB) iyo ogaanshaheeda



Somali_56295 TB Diagnosis.indd 1 11/06/2009 12:49

## TB du waa maxay?

Qaaxadu (TB) waa baakteeriya ifagshan ah oo badanaa laga helo sanbabada qayb kasta oo jidhka ka mid ahna ku dhici karta. Taas waxa la yidhaahdaa Active TB waana la dawayn karaa haddii door dawo ah la qaato oo ah ugu yaraan in laqaato lix bilood. TBda sanbabada ama cunaha oo kaliya ayaa cudurka koriya, dadka badankiisa kuma fiddo hadday laba wiig gudahood ku bilaabaan iney qaataan dawada.

Waxa kaloo dhici karta inaad qaadid TBda qarsoon, ama TBda ifagshanka ah. Taas macnaheedu waxa weeye qaaxadii waad qabtaa laakiin jidhkaaga ayaa kontaroolaya oo diidaya inaad bukootid. Dadka qaba TBda qarsoon lagama arko wax astaamo ah umana gudbin karaan dadka kale.

## Sideebaa TBda loo qaadaa?

Marka uu qufaco ama uu hidhiso qof qaba qaaxadu wuxuu hawada ku siidaayaa jeermis kaas ayuu dad kalana neefsdaan oo qaataan. Dadka badanaa qaadaa waa kuwa in badan la jooga kuwa qaaxada qaba (badanaa kuwa is qaba iyo kuwa guriga kula nool ama sida naadirka ah jaalihiisa shaqada). Qaaxadu kuma fiddo candhuuf la tufo ama weel wax lagu wada cuno.

## Waa maxay astaamaha qaaxadu?

Astaamaha caamka ah ee qaaxada ku dhacda sanbabadu waxa weeye:

- **Qufac joogto noqda in ka badan saddex wiig.** Wuxuu u bilaabmayaa qufuc qalalan oo ririxanyo leh, oo aan waxba ka duwaneyn ifagashan kasta oo laabta ku dhaca. Qufaca qaaxadu wuu joogaya wiigag ama bilo intaasna wuu sii xumaanayaa.
- **Miisaanka oo luma iyadoon wax sabab ah aan la arkaynin.**
- **Xumad iyo dhidid badan oo habeenkii ah.** Xummadda cudurkani waxay badanaa timaadaa habeenkii oo ku dhalisa inuu qofka bukaa aad u dhidido, taasi waxay daruuri ka dhigi kartaa in maryaha hurdada oo dhan saqda dhexe la bedelo.
- **Dareen guud oo daal ah iyo caafimaad darro.**
- **Cunto xumo.** Astaamahan oo dhami hadana way noqon karaan calaamado mushkulado kale.

## Sideen u ogaanayaa haddaan qaaxo qabo?

Haddaad isku aragtid astaamahan saddex ka mid ah ama ka badan u tag dhakhtarkaaga (way dhici kartaa marka dhakhtarku eego iney noqdaan xaalado kale). Haddey u maleeyaan iney qaaxo tahay waxay kuu dirayaan dhakhtarka feedhaha ma qaaxado ee xaafadda, halkaas oo lagu baadhidoono.

Haddaad garaneysid qof qaaxo qaba, dhakhtarku wuxuu waydiinaya dadka inta badan ay la joogaan. Dabadeed shaqaalaha caafimaadka ayaa la xidhiidhaya qofkasta oo ay uga shakiyaan inuu khatar ugu jiro inuu qaado cudurka oo ay ugu yeedhaan baadhitaan.

**Baadhitaanada kala duwani waxa weeye:**

## Baadhitaanka jidhka (Mantoux)

Baadhitaanka jidhku waxay tusineysaa in weligaa jidhkaaga ay qaaxo ku dhacday. Waxa lagu baadhayaa tallaalka BCG (oo ay ku jiraan jeermis aan waxyeelo lahayni) ama ku neefsashada jeermiska qaaxada. Taas waxa layidhaahdaa Baadhitaanka Mantoux oo waxa la hawlgashaa in yar oo dheecaan ah, taas waxa la yidhaahdaa qaaxo toos loogu muday maqaarka sare ee jidhkaaga. Inyar way ku hafeefan laakiin xanuun sii jiraya ma aha. Natiijada baadhitaanka waxa la akhriyayaa 2-3 cisho ka bacdi.

Haddii cudurka lagaa helay, waxa la arkayaa meel casaatay, meeshaas balastar ha saarin, ha xoqin oo ha masixin ama saliid iyo dhaashi ha marin halkaas, waad ku maydhi kartaa saabuun iyo biyoba. Darajooyin iyo cabirro kala jaada ayuu casaankaasi leeyahay. Dhakhtarka ama kalkaaliyaha dhakhtarka jooga ayaa eegaya baadhitaanka oo kuu macneynaya natiijada.

## Waa maxay macnaha baadhitaanka jidhka ee haa noqday?

Baadhitaanka jidhka ee haa noqday dhawr macno ayuu yeelan karaa:
Waxaad qaadatay tallaalka BCG. Haddaad qaadatay waxa la arki karaa ficil-gelin yar waana caadi.
Waxa kugu dhici karta TBda qarsoon. Waxa lagu waydiin doonaa in dhiigaaga la baadho si loo hubiyo infegshanka TBda qarsoon.
Waxa kugu dhici karta TBda firifircoon oo waxa loo baahandoonaa in dhakhtarku ku arko si baadhis dheeraada laguugu sameeyo.

## Waa maxay macnaha baadhitaanka jidhka ee mayada noqday?

Taas macnaheedu waxa weeye waxa laga yaabaa inaadan jeermiska TBda hore u qabin. Ama waxay noqon kartaa in baadhitaanka lagaa qaaday ka hor intii aanu jidhkaagu la ficil-gelin.

Waxa loo baahanyahay in baadhitaanka lagu celiyo muddo lix bilood ah. Baadhitaanka mayada noqday micnihiisu markasta ma aha ma qabtid TB.

Haddi aanad qabin qaaxo laakiin aad khatar ugu jirtid inaad qaado sababta oo ah halka aad ku nooshay iyo halka aad ka shaqaysid , waxa lagu siindoonaa tallaalka BCG, haddii aad u nugushahay (sida dadka qaba HIV ama xubin kale lagu talaalay) lagugu tallaali maayo BCG waayo xaaladan oo kale tallaaka ayaa khatar ku gelin kara.

## Baadhitaanka dhiigga

Waxa jira baadhitaanka dhiigga oo gaar u ah TBda. Haddii Baadhitaankaaga jidhku noqday haa oo is dhexgasheen qof qaba cudurka TBda (laakiin adigu ma lihid wax astaamo ah), markaa waxa lagu weydiinayaa in baadhitanka laguu sameeyo si loo ogaado bal inaad qabtid TBda qarsoon. Haddi baadhitaanka dhiigu noqdo haa waxa lagu marin doonaa baadhitaano kale si loo ogaado inaad qabin TBda firfircoon.

Dadka qaba TBda qarsoon ee da'doodu ka yartay 35 sano waxa la siinayaa door daweyn ah oo qaata ilaa saddex ama lix bilood. Dadka ka weyn 35 sano ee aan qabin HIV lama siinayo dawadan waayo dawada lidka TBdu beerka ayey wax yeeshaa. Kuwa qaba HIV iyaga markasta dawada waa la siinayaa da'doodu in kasta ha le'ekaatee waayo TBda qarsooni si hawl yar oo dhakhso ah ayey u hawl galeysaa waxaanay kordhineysaa jeermiska HIVga.

## Sawirka feedhaha

Haddaad leedahay astaamaha qaaxada, waxa laguu dirayaa in sawir feedhaha ah lagaa qaado. Taasi waxay dhakhtarka tusineysaa sanbabadaadu iney TB qabaan iyo in kale.